# *Horizon Institute waxa ay Dib u cusboonaysiinaysaa Baaqeedii ahaa in la helo Baadhis Madax-bannaan oo ku saabsan Kiiskii Xarrunta Agoomaha Hargeysa ee qaabka xun loo maareeyey*

**12 January 2021**

25 June 2020, *Horizon Institute* waxa ay soo saartay baaq dadweyne oo ay kaga codsanaysay xukuumadda Somaliland in ay billaabaan baadhis madax-bannaan sidii, iyo sababtii Laanta Danbi Baadhista (CID) ay ugu guuldaraysatay in ay sameeyaan baadhis dhab ah oo ku saabsan eedaymaha in gabadh dhallinyaro ah oo ku noolayd Xarrunta Agoomaha Hargeysa ay martay qadhaadhka iyo xanuunka kufsiga. Tallo-soojeedintaasi waxa ay lahayd ujeedo laba dhinac ah. Waa ta koowaade in la xaqiijiyo in dhibanuhu ay hesho caddaaladdii ay u baahnayd isla markaa ay u qalantay. Ujeedada labaad oo ahayd in la xaqiijiyo in ay jirtay caddayn ku filan oo ka dhan ah wiilasha dhallinyarta ah ee ku noolaa Xarrunta Agoomaha kuwaas oo loo xidhay danbiga kadib markii CID-du samaysay dhawr waraysi oo degdeg ah.

Nasiib-darro, dib-u-eegis madax-bannaan may dhicin. Taabadalkeeda, waxa lagu degdegay xukunkii, halkaas oo laba maxkamadood ku qabsoontay Hargeysa, October oo ay ka hor qabsoontay Maxkamadda Gobolka ee Maroodi-Jeex iyo December oo ay ka hor qabsoontay Maxkamadda Racfaanka ee Maroodi-Jeex. Warbixin ay *Horizon* soo saartay 30-kii December 2020, waxa ay ku faahfaahisay Gafka Caddaaladeed ee ka dhanka ah shanta wiil kuwaas oo si joogto ah u diiday in ay ku lug lahaayeen kufsiga. Iyada oo ku doodaysa in go'aanka xukun xabsiga lagu riday aanu sharciga waafaqsanayn, *Horizon* sidoo kale waxa ay cambaaraysay maqnaanshaha caddayntii ka dhanka ahayd dhallinyartan eedaysaneyaasha ah. Kiisku hadda waxa uu hor yaalaa Maxkamadda Sare oo dhagaysan doonta, halkaas oo la rajaynayo in ay sii deyn doonto wiilashaas.

Shalay, 11 January 2021, qoysaska afar kamid ah dhallinyartaas ayaa telefishanka si cad uga hadlay. Waxa ay direen baaq ah in ay caddaalad helaan, taas oo ayna u rabin oo kaliya ubadkooda ay waalidka u yihiin, balse sidoo kale in dhibanuhu hesho caddaalad. Ubucda doodoodu waxay ahayd in hannaanka caddaalad ciqaabeedku uu ubadkooda ula dhaqmay si caddaaladda ka baxsan, waxay ku salaysnaayeen saddex qodob oo muhiim ah oo kiiska ku saabsan.

Qoysasku waxa ay tilmaameen in sababtii ugu weynayd ee ay u guuldaraysteen labadii maxkamadood ee qabsoomay in ay ahayd maqnaanshaha caddayntii. Sidii ay *Horizon* ku xustay warbixintii 30-kii December 2020, afar markhaati oo kaliya ayay soo bandhigtay xeer-illaalintu, saddex xubnood oo ka tirsan maamulka Xarrunta Agoomaha iyo baadhihii CID-da. Mid sheegay in uu markhaati ka ahaa kufsigu ma jirin; xaqiiqo ahaan, waxa ay ka marag-fureen in aan wax kufsi ahi dhicin. Shanta wiil waxa ay qirteen in ay u yeedheen gabadha yar codsi uga yimid mid kamid ah wiilasha qirtay , balse waxa ay sheegeen in ayna garanayn sababta uu u doonayey in uu arko inanta. Xeer-illaalintu marnaba may soo bandhigin caddeyn kale oo xoojinaysa arrintan.

Qodobka labaad, qoysasku waxa ay si sax ah u weydiiyeen sababta ay CID-du ugu soo koobtay baadhistooda koox dhallinyar ah oo kaliya markii si joogto ah loo xusay, ***oo ay ku jirto Maxkamadda Racfaanka lafteedu,*** in ay jiraan dad kale oo weli xor ah oo aan la baadhin. Dad qaraabo dhaw u ah dhibanaha ayaa iyaguna marar badan codsaday in la ballaadhiyo baadhista laguna daro shaqaalaha Xarrunta Agoomaha.

Ugu danbayntii, waxa muhiim ah, qoysaska wiilashaasi waxa ay su’aal ka keeneen sharciyadda xadhigaas shanta wiil, iyaga oo sheegay in markii la soo qabtay June 2020, ay da’doodu ka yarayd da’dii masuuliyadda danbiga oo ah 15 jir wax ka yar. Waxa xusid mudan in Xeerka 2007 Garsoorka Carruurta ee Somaliland uu mamnuucayo xadhiga, dacwad oogista iyo xukunka carruur da’doodu ka yar tahay 15. 14 June 2020, *Horizon* waxa ay warqad u qortay madaxa CID-da si ay u muujiso in ay ka soo horjeedaan xadhiga sharci darrada ah ee wiilashaas da’doodu u dhaxayso 12 iyo 14. Halkii ay ahayd in si dhab ah loo soo xaqiijin lahaa da’da dhabta ah ee carruurtaas iyada oo la isticmaalayo hab kasta oo suurtagal ah, maadaama ayna dadku haysan shahaadadda dhalashada, xeer-illaalintu waxa ay ka codsadeen Cisbitaalka Guud ee Hargeysa oo ay xukuumaddu maamusho in uu baadho, habkaas oo aan ahayn mid cilmi ku dhisan ama lagu kalsoonaan karo. Waxa aan la yaab ahayn, Cisbitaalkii Hargeysa waxa uu dib u soo celiyey warqad caddaynaysa in da’dii wiilasha loo baddalay 15 iyo wax kasii weyn, iyada oo la waafajinayo in dacwad lagu soo oogi karo. Xaqiiqada ah in cisbitaalku ku khaldamay in da’ isku mid ah uu siiyey laba wiil oo walaalo ah, oo aan mataano ahayn, waxa uu hoosta ka xarriiqayaa shakiga nooca baadhista iyo natiijada la gaadhayba.

Qoysaskii shalay hadlay waxa ay sidaa u sameeyeen iyaga oo rumaysan in codkooda oo la maqlaa uu sababi doono, ugu yaraan in natiijo fiicani ka soo baxdo kiiska marka uu gaadho Maxkamadda Sare. *Horizon Institute* waxa ay la wadaagaysaa in helitaanka dhegaysi xog iyo caddaalad ku salaysan, isla markaa si fiican loo baadhay uu sababi doono in shantaa wiil helaan xorriyadooda. Natiijadaas oo sidoo kale ay la socoto in la go’aansado in laga gun gaadho xaqiiqada wixii ka dhacay Xarrunta Agoomaha, sidee ayay u dhici kartaa in gabadh yar oo daryeelkooda ku hoos jirtaa ay u mari karto dhibtaas qadhaadh, waa maxay sababta loo daboolay yaase qaadaya masuuliyadda dhacdooyinkaa silsilada murugada leh ee iska daba dhacayey.

Guji halkan si aad u daawatid waraysigii Telefishanka ay siiyeen qoysasku, Horn Cable iyo MM Somali TV.

Guji halkan si aad u akhridid labadii warbixinood ee hore ee ay Horizon ka diyaarisay kiiska Xarrunta Agoomaha:
Bayaanka 1: Somali, English.
Bayaanka 2: Somali, English.

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org.***